

Boogga barnaamijka – InfoMentor Hub

Isha infoMentor ee ardayga iyo waalidka waxaa loo yaqaan infoMentor Hub. Wuxuu u jiraa si bog internet iyo si qalabka abka (app) wuxuuna ka kooban yahay warbixino isku mid ah. Ardayda iyo waalidiinta/mas’uulka caruurta waxay haystaan habab ay ku isticmaali karaan oo isku mid ah aan ka ahayn in ardayda aysan sameyn karin soo wargelinta maqnaanshaha ardayda, aysana ballansan karin waqtiyada wadhadalka horumarka ama aysan diiwaangelin karin jadwalka xilliga firaaqada.

Gelitaanka barnaamijka

Mas’uulka caruurta/waalidka ayaa wuxuu helayaa farriin elektarooni ee kicinta barnaamijka taasoo shaqaynaysa ilaa 14 maalmood. Waxaad geleysaa adigoo isticmaalaya magac adeegsi iyo lambar sir. Si aad u gaarto waxa ku jira sanduuqyada Qiimeynta iyo qoraalada ayaa waxaad u baahan aqoonsiga elektarooniga ee bankiga (Bank ID). Haddii aadan lahayn aqoonsiga bankiga waxaad la xiriireysaa iskuulka/dugsiga xanaanada. Waxaa muhiim ah in qofku ilaashado macluumaadkiisa gelitaanka barnaamijka si qof aan fasax u haysan uusan u heli karin warbixintiisa shakhsiga ama uusan waxna ku qori karin ama ku diiwaangelin karin qof kale magacii.

Infomentor-Astaanta – Si loogu laabto bogga hore waa inuu qofku ku dhuftaa InfoMentor-logotypen.

Saacadda ku jirta geedka buluug caddaanka ah (Klockan) – Warbixin cusub ee barnaamijka la geliyo ee ku khuseysa ardayda/caruurta waxaa halkan lagu wargelinayaa lambar. Qalabka appka ayaa waxaa xitaa laga heli karaa in laguugu soo diro telefoonkaaga casriga ah ogeysiisyo kaasoo aan kula talineyno qofka si uu u helo warbixinta markaa jirta.

Baqshadda (Kuvertet) – Waa tan hawsha **Farriimaha (Meddelande)** u haysa nadaamka, taasoo ah marinka warbixinta elektarooniga ugu weyn ee u dhexeysa iskuulka/dugsiga xanaanada iyo waalidiinta/mas’uuliyiinta ilmaha. (ardayda iyo macallimiinta waxay ku wada xiriiraan guud ahaan si Kooxo (Teams) ah. Lambarku wuxuu sheegayaa farriin cusub. Si aad u akhriso farriin iyo si loo diro farriin waxaa la garaacayaa baqshadda. Kudhufo ”svara” fariinta kuu timiday. Si aad u qorto farriin cusub waxaad ku garaaceysaa baqshadda calaamadda ku dar (plustecken) ee dhinac ag taal. Halkan waxaad ku dooran kartaa inaad u dirto farriin-guddoome iskuulka ka tirsan (dad badan waa la dooran kartaa) adigoo ku dhufanaya ”Till ”, ku qor cinwaanka (Titel) iyo farriinta kadibna dir. Qofkii shaqaalaha ee loo diray asagana wuxuu ku helayaa farriin wargelin emaylkiisa in ay farriin u taal infoMentor si loo xaqiijiyo in farriintu gaartay. Waxaa muhiim ah in farriinta loo diro dhammaan shaqaalaha ay khusayso si warbixinta loo gaarsiyo.

”Boggayga xaaladda nololaha” (Min profil) (mas’uulka iyo magaca ilmaha) – Halkan waxaad uga wareegeysaa boggaga infoMentor ee caruurtaada kale. Waxaad xitaa halkan ku beddeli kartaa magaca iyo lambarka sirta aad ku galeyso barnaamijka iyo waxaad ku sameysan kartaa kood sir ah ee lagu soo galo bogga internetkan.

Toosinta (Inställningar) – Halkan waxaa lagu soo bandhigayaa **warbixinta shakhsiga**. Cinwaanka waxaa laga soo minguurinayaa xafiiska canshuuraha ayadoo la isticmaalayo kala wareejinta habeenimadii si haddii cinwaan kale meesha loogu qoro loogu wareejiyo maalinta xigta. Waxaa kaloo halkan lagu beddeli karaa cinwaanka emaylka iyo lambarka telefoonka. Hadday sidaa tahay waxaa markaa muhiim ah inaad soo wargeliso iskuulka/dugsiga xanaanada si cinwaanada saxa ah ay noogu jiraan nadaamyadeena xafiisyade kale xitaa.

Toosinta koontada (Kontoinställningar) – Halkan waxaad ku dooran kartaa cinwaanada afka ingiriiska ama afka iswiidhishka ee nadaamka ku jira.

Sirqarinta (Sekretess) – Halkan wuxuu qofku ka xakamayn karaa waxyaabaha laga arki karo liiska xiriiryada ee ku saabsan asaga iyo caruurtiisa. Si kastaba ha noqotee Sanduuqa liiska xiriiryada laguma soo bandhigi doono nadaamka markaa wax warbixin adiga iyo caruurta ku saabsan uma muuqanayaan waalidiinta ama ardayda kale ee nadaamka ku jira.

Habee barnaamika app (Konfigurera app) – Halkan waxaad ka heleysaa macluumaad ku saabsan isku xiridda koontadaada infomentor iyo barnaamijka abka ee infomentor. Qofku wuxuu ku soo degsanayaa barnaamijka "informer hub" telefoonkiisa casriga ama aybaadka kadibna halkaas ka furayaa barnaamijka abka. Meesha ka hooseysa *Autentisering* ee gudaha barnaamijka abka ayaa waxaa la dooranayaa "*Använd annan enhet*". Gudaha barnaamijka waxaa lagu dhufanayaa "*Generera qr-kod*" kadibna waxaa abka la marsiinayaa iskaanka koodka qr "qr-kod" oo aad dooraneyso kood sir afar lambar ah. Markaana koontada iyo qalabka abka waa la isku xiray.

Qaybaha la isku xiray (Sammankopplade enheter) – Halkan waxaad ku arkaysaa qaybaha elektarooniga ee lagu xiray koontada.

Ogeysiisyada (Pushnotiser) – Halkan wuxuu qofku ku dooran karaa ineysan usoo dhicin ogeysiisyo qayb ka mid ah. Qalabka abka ayaa qofku wuxuu ku heli karaa ogeysiisyo ku saabsan warbixinta nadaamka ku jirta. Bogga internetka qofku waa inuu si joogto ah u galaa oo uu raadsadaa warbixinada cusub.

Wadahadalka horumarka ardayda (Utvecklingsamtal) – Halkan waxaa lagu ballansan karaa wadahalka horumarka ardayda, sanduuqaana waxaa la arkayaa keliya marka shaqaalaha ay ku soo qoraan xilliyada la ballansan karo. Ardaydu ma arki karaan sanduuqan. Maadaama ay macallimiin badan ay wadahadallada horumarka la yeelan karaan isla hal koox arday ah markaa waxaa muhiim ah in qofku ka ballansado wadahadalka macallinka caruurtiisa u dhiga. Marka uu qofku sameysanayo ballanta wuxuu xitaa qori karaa farriin. Shaqaaluhu ma helayaan wax ogeysiis ah oo ku saabsan farriintan, laakiin waxay keliya ku arkaan aragtida wicitaankood. Haddii mas'uulka caruurta uu rabo inuu baajiyo wadahadal uu ballansaday wuxuu qofku ku dhufanayaa baajin (avboka). Kadibna qofku wuxuu haddana ka dirayaa barnaamijka gudahiisa **Farriin (Meddelande)** (astaanta baqshadda) oo uu u dirayo macallinka si ay u gaarto warbixinta baajinta wadahadalka.

Qorshaha todobaadka (Veckoplan) (khusaysa keliya iskuulka) – Halkan waxay macallimiintu dhigayaan warbixinta todobaadka taagan, tus. faahfaahinta hawlaha, layliyada, imtixaanka, warbixinta ku saabsan imtixaanka, warbixinta ku saabsan maalin gaar ah. Ugu sareyn waxaa jiri kara warbixino guud ee khusaysa xilli kooban. Waxaa todobaadyada lagu beddelayaa falaadhaha waxaana la arki karaa warbixinta maalin gaar ah khusaysa ayadoo la riixayo maalintaa. Qorshaha todobaadlaha waa la daabacan karaa.

Jadwalka (Schema) (khusaysa keliya iskuulka) – Halkan waxaa lagu soo bandhigayaa jadwalka ardayda. Si loo helo warbixinta casharada (maadada, waqtiga iyo macallinka) waxaa la garaacayaa halkan. Waxaa todobaadyada laga beddelayaa falaadhaha dhinaca taariikhda. Jadwalka waa la daabacan karaa.

Maqnaanshaha ardayda (Frånvaro) (iskuulka) – Halkan waxaa wargelin ku samayn kara mas'uulka caruurta haddii ilmuhu aysan imaan karin iskuulka tus. Sabab xanuun. Waxaa meesha laga arki karaa maqnaanshaha ardayda ee hore loo soo wargeliyey (ee mas'uuliyiinta caruurta iyo maamulka iskuulkuba uu soo gudbiyey). Si faahfaahin dheeraad looga helo waxaa uu qofku ku dhufanayaa maqnaanshaha gaarka ah. Qofku wuxuu maqnaanshaha ku soo gudbinayaa asagoo isticmaalayo badhanka cagaarka ah. Waxaa la gudbin karaa maqnaanshaha maalinta lagu jiro iyo maalinta soo

socota, maalintii oo dhan ama xisad/xisado kooban. Ku dhufo badhanka *Anmäl frånvaro (soo gudbi maqnaanshaha)*. Haddii qofku uu rabo inuu wax ka beddelo maqnaansho uu hore u soo gudbiyey waa inuu lasoo xiriiraa maamulka dugsiga. Haddii ay dhacdo ka maqnaansho xisadda bilaa sabab ah waxaa farriinta SMS loo soo dirayaa mas’uulka ilmaha (hadii lambarka telefoonka gacanta uu ku jiro barnaamijka InfoMentor). Waxaa la dirayaa 1 farriin SMS/cunugiiba/maalintiiba. Haddii ardaydu ay sabab la’aan ka maqnaadaan casharada in ka badan hal xisad waxaa ogeysiis ugu soo dhacaysa qalabka barnaamijka abka mas’uulka caruurta iyo ardayda. (Xitaa ogeysiintu wey soo dhacaysaa marka uu jiro maqnaanshaha ugu horeeyo ee sabab la’aanta ah). Ardaydu ayagoo barnaamijka gelaya ma soo gudbin karaan maqnaanshahooda.

Maqnaanshaha ardayda (Frånvaro) (dugsiga xanaanada) – Halkan waxaa wargelin ku sameyn kara mas’uulka caruurta haddii ilmuhu aysan imaan karin iskuulka. Tus. sabab xanuun ama fasax. Waxaa meesha laga arki karaa maqnaanshaha ardayda ee hore loo soo wargeliyey. Si warbixin dheeraad ah looga helo waxaa uu qofku ku dhufanayaa maqnaanshaha gaarka ah. Qofku wuxuu maqnaanshaha ku soo gudbinayaa asagoo isticmaalayo badhanka cagaarka ah. Waxaa la gudbin karaa maqnaanshaha maalinta lagu jiro iyo maalinta soo socota. Halkan waxaa xitaa lagu qori karaa faallo bixin tus. fasax. Waxaa muhiim ah in aan halkan lagu qorin warbixin ku saabsan caafimaadka oo laga fogeeyo nadaamka sida ku xusan xeerka GDPR.

Warbixin (Information) – Halkan waxaa yaalla 3 sanduuq: *Akhbaarta (Nyheter)* (akhbaar ku socota kooxda/fasalka), *Faylasha (Filer)* (warbixinta muddo dheer la isticmaalay ee iskuulka/dugsiga xanaanada oo dhan loogu talo galay) iyo *Boggag xiriiriyeyaal (Länkar)* (boggag la isticmaali karo oo loogu talo galay mas’uulka/waalidka caruurta). Qofka waxaa u soo dhacaysa ogeysiin marka wax cusub lagu soo daabaco sanduuqa wararka ee khusaya ilmahiisa.

Qiimeynta (Bedömningar) (khusaysa keliya iskuulka) – Halkan wuxuu iskuulku ku daabacan karaa qiimeynta maadada ee shaxda maadooyinka, qiimeynta ee foomka qiimeynta iyo hadday ardaydu qaadanayaan shahaado. Waxaa loo baahan yahay in la haysto aqoonsiga elektarooniga bankiga si loo galo qaybtan Qiimeynta (Bedömningar).

Qorshaynta (Planeringar) (khusaysa keliya iskuulka) – Sanduuqan wuxuu ku kooban yahay qorsheyaasha macallinka ee maadooyink kala duwan.

Waraaqaha caddaynta (Dokumentation) (khusaysa keliya iskuulka xaaladda maanta) – Haddii macallinku uu doorto inuu ku qoro feel tallaabooyinká horumar iyo waxbarasho ee ardayga halkan ayuu ku sameyn karaa. Feelka IUP ayaa iskuulku ku daabici karaa qorshaha horusocodka leh. Barnaamijka tallaabooyinka ayaa sida maantuba tahay waxaa si waraaqo ahaan boostada loogu soo diri doonaa guriga waalidiinta ay khusayso. Mustaqabalkuna qaybo ka mid ah barnaamijka tallaabooyinka ayaa lagu daabaci doonaa halkan infoMentor.

Kalandarka (Kalender) – Halkan wuxuu iskuulka/dugsiga xanaanada uu dhigi doonaa hawlaha firfircoonida ee la qorsheeyey. Foomka su’aalo weydiinta ee iskuulku/dugsiga xanaanada uu soo daabacay ayaa halkan lagu arki karaa.

Bogga shakhsiga (Blogg) – Halkan wuxuu iskuulka /dugsiga xanaanada soo dhigaaa warbixin ku si waalidiintu / mas’uulka caruurta ula socdaan hawlaha dugsiga. Qoku wuxuu dooran karaa inuu arko koox/fasal walba ama dhammaan boggaga ardayda/caruurta oo wadajira. Ardayda iyo shaqaalaha faallo waa ay ka bixin karaan bogga marka iskuulka la joogo. Marka dugsiga xanaanada la joogo waalidiinta iyo shaqaalaha ayaa faallo ka bixin kara bogga.

Jadwalka xilliga firaaqada (iskuulka/diiwaangelinta waqtiga (dugsiga xanaanada) – Fritidsschema (skolan)/Tidsregistrering (förskolan) – Halkan waxaa lasoo dhigayaa jadwalka xilliyada ay caruurta joogaan dugsiga xanaanada/goobaha xilliga firaaqada. Sanduuqan ma arkayaan ardayda.

Si shaqaalaha dugsiga xanaanada iyo xilliyada firaaqada marka ugu horeyso ugu isticmaalaan waqtigooda iney gacanta ku qabtaan oo ay wax baraan caruurta ayaa waxaa muhiim ah in waalidiintu ay ku diiwaangeliyaan jadwalka waqtiga ee caruurta barnaamijka infoMentor.

Si loo arko muuqaalka guud ee todobaadka ayaa waxaa la garaacayaa *Hela veckan (Todobaadka oo idil)*. Todobaadyada waxaa lagu beddeli karaa ayadoo lagu dhufanayao falaaraha. Haddii lagu dhufto hal maalin waxaa la arakayaa jadwalka maalintaa.

Tilmaamaha si loo geliyo jadwalka maalin:

Ku dhufo maalinta aad rabto inaad diiwangeliso/wax ka beddesho kadibna ku dhufo *Lägg till/Ändra dag*. Ku buuxi waqtiyada maalintaa khusaysa. Haddii loo baahdo ku qor faallo, tus. "Ayeeyo ayaa soo kaxayn doonta caruurta". Kadibna ku dhufo *Spara*. Marka qofku ku qoro faallo waxaa soo muuqanaya calaamadda xumbada ee maalintaa. Faalada la qoray waxaa arkayaa shaqaalaha dugsiga xanaanada waxay kaloo ay helayaan calaamad ah in faallo cusub la qoray. Ayagana waxay halkaa ku qori karaan faallo laakiinse waalidiintu waxaay taa arkayaan keliya hadday ay galaan diiwaangelinta waqtiga. Shaqaalaha dugsiga xanaanada way og yihiin in aanu waalidiinta wax ogeysiin ah gaareynin in faallo halkaa lagu qoray markaana halkaa uma isticmaalaan hab ay ula xiriiraan waalidiinta.

Ayadoo la eegayo qorshaynta hawlaha lama beddeli karo jadwalka isla maalintii. Taa waxay khusaysaa xitaa faallooyinka ku aadan jadwalka. Haddii qofku uu rabo inuu beddelo jadwalka wuxuu ku qorayaa **Farriin** barnaamijka (calaamadda-baqshadda) ee ku socota shaqaalaha ay khusayso ama wuxuu wacayaa dugsiga xanaanada/xilliga firaaqada.

Tilmaamaha dejinta jadwalka todobaad buuxa iyo ku celinta jadwalka:

Ku bilow todobaad cusub oo leh maalin isniin oo jadwalka la dejin karo. Ku dhufo *Lägg till/Ändra vecka (Ku kordhi/Bedel todobaad)*. Ku buuxi waqti bilowga iyo dhammaadka.

Si loogu celceliyo jadwalka waxaa la garaacayaa sanduuqa *Upprepa registreringarna för denna vecka (Ku celi diiwaangelinta todobaadkan)*. Si loogu celiyo jadwal isku mid ah todobaad walba waxaa lagu qorayaa 1aad sanduuqa todobaadyada. Si loogu celiyo jadwal isku mid ah labadii todobaadba mar waxaa lagu qorayaa 2aad sanduuqa todobaadyada iwm. Ku buuxi cadadka todobaadyo jadwalku uu shaqeynayo ama ilaa iyo taariikhdee ayuu shaqeynayo. Waalidka leh caruur lala qaybsanayo joogitaankooda guriga tus. labadii todobaadba mar, markaa waxaa uu ku buuxinayaa waalid walba jadwalkiisa labadii todobaadba mar, todobaadka kalena wuu ka tegayaa ayadoo banaan si waalidka kale uu ugu buuxin karo jadwalkiisa todobaadyada waalidkaa u gaarka ah.

Kadibna qofku wuxuu ku dhufanayaa *Spara (Kaydi)*.

Dhawaan waxaa jiri doona tiir/qayb oo ah "Ledig" (Fasax) si loo waadixiyo farqiga u dhexeeya in la seegay in la geliyo jadwalka iyo in ay banaan tahay .

Inta aan tiirkan la sameyn qofku wuxuu kaga tegi karaa meel banaan haddii caruurta ay fasax noqonayaan. Waalidka dugsiga xanaanada wuxuu ku soo wargelinyaa xitaa maqnaanshaha caruurta sanduuqa maqnaanshaha (**Frånvaroboxen**) ee wadata faalada ah "Ledig – Fasax". Haddii qofku uu ku soo wargeliyey iskuulka in caruurta ay fasax yihiin maalin dhan markaa waxay u muuqaneysaa taa shaqaalaha xilliga firaaqada xitaa.